

Friday, April 8, 2022

Shardigii xirashada Maaskaraha waxaa La qaaday Isniinta, Abriil 11, 2022

Bulshada BC ee qaaliga ahow,

Waad ku mahadsan tihiiin taageeradiinna maadaama aan kusii jirno sannadkii labaad ee xanuunka safmarka ah. Sida aad ogtihiin, jawaabteenna ku aaddan xaaladha isbadalaya ee cudurka safmarka ah waa ay soo jireen waxayna sii ahaan doonaan kuwo lagu salaynayo xog iyo go'aan qaadasho mas'uuliyad kujirto si aan sida ugu wanaagsan ugu shaqayno ardaydeenna, shaqaalaheenna, iyo bulshada. Xogtaanu waxay bilowday in ay isbadasho waxayna noo ogolaatay fursad ah in aan wax ka badalno istiraatiijiyadaheenna yaraynta xanuunka safmarka ah.

Hoggaanka degmadu wuxuu baarayay heerarka kiisaska COVID-19 iyo guud ahaan xogta degmada. Kaddib markii aan kasoo laabanay fasaxeennii gu'ga todobaadkii lasoo dhaafay, heerka kiisasku hoos ayay u socdeen laba xaaladood kiis wadar ahaan. Waxaan ku faraxsanahay in aan ku dhawaaqo in shuruuddii maaskaraha ee dhammaan degmada ee Brooklyn Center Community School la qaadi doono todobaadkaan dhammaadkiisa. **Laga bilaabo Isniinta, 11, 2022, maaskaruhu wuxuu noqon doonaa mid la iskula taliyo laakiin aan waajib ahayn marka la joogo dhismeyaasha degmada.**

Xasusin ahaan, waxaan sii wadi doonnaa in aan bartilmaameedsanno talaabooyin lagu yaraynayo si loo joojiyo faafitaanka COVID-19. Waxaa jiri kara xaalado wali u baahan kara in la xirto maaskaraha sida qof kasta (oo tallaalan ama aan talaalnayn) kaasoo xiriir dhow la yeeshay qof laga helay COVID-19. Hadii qof laga helo cudurka uuna kusoo laabto dugsiga/shaqada 5 maalmood kaddib, maaskare ayaa laga rabaa ilaa laga gaarayo maalinta 10aad.

Waxaan ku faraxsannahay in aan wajiga canuggaaga oo faraxsan mar labaad ku aragno fasalada yada!

Daacad kuu ah,

Dr. Carly Baker, Kormeeraha guud